



NORTH LONDON PARTNERS
in health and care

North Central London's sustainability
and transformation partnership



Improving planned orthopaedic surgery for adults in north central London

(Somali)

Kobcinta qalliinka lafaha ee qorshaysan ee dadka waaweyn kuwaas oo ku nool woqooyiga London

Waxaan soo jeedineynaa isbedelo in lagu sameeyo sida dadka waaweyn loogu sameeyo qalliinada lafaha, kala goosyada iyo muruqyada (qalliinka lafaha ee qorsheysan).

Tani waxaa ka mid ah beddelaadaha lagu sameeyo miskaa iyo jilibka; iyo qalliinada kale ee lagu sameeyo miskaha, jilbaha, garbaha, xusullada, cagaha, canqowyada iyo gacmaha.

Taariikhda xidhitaanka jawaab celinta: 6 Abriil 2020

Ku saabsan wadatashigan

Waxaan eegaynaa sida aan qalliinka lafaha ee qorshaysan u siino dadka waaweyn ee ku nool Barnet, Camden, Enfield, Haringey iyo Islington (woqooyiga dhexe ee London) waxaan jeclaan laheyn aragtidaada ku aadan soo jeedintayada.

Guudmarkan wuxuu sharxayaa soo jeedinteenaa oo ah sida wax looga qaban karo caqabadaha jira ee aan wajaheyno si aan adeegyada qalliinka lafaha ee qorshaysan ugu bixino woqooyiga bartamaha London oo dhan. Waxaan kaa codsaneynaa fikradahaaga ku aadan soo jeedintayada, ka hor intaanaan go'aan gaarin. Waxaan sidoo kale jeclaan lahayn inaan maqalno haddii aad haysatid soo-jeedinno kale, iyo waxa ay yihiin.

Dokumentiga wadatashi oo buuxa iyo macluumaad dheeri ah ayaa laga heli karaa: www.northlondonpartners.org.uk/orthconsultation

Waa maxay qalliinka lafaha ee qorsheysan?

Qalliinka lafaha waxaa lagu daweyyaa dhaawacyada lafaha, kala goosyada, xinjirooyinka, seedaha, muruqyada iyo dareemayaasha (nidaamka lafaha iyo muruqyada ee jirka). Bukaana waxaa loo gudbin karaa dhakhtarka qalliinka lafaha haddii ay jirto xaalad muddo-dheer oo soo kobcaysay sannado badan, sida xanuunka lafaha ama dhaawacyo kale oo aan degdeg ahayn.

Beddelaadda miskaha iyo jilibka ayaa ah noocyada ugu caansan ee qalliinka lafaha ee lagu bixiyo NHS, iyo qalliinada kale ee miskaha, jilbaha, garbaha, xusullada, cagaha, canqowyada iyo gacmaha.

Qalliinka qorshaysan waa marka bukaanada ay ballan horay u sii qabsadaan. Waa daaweyn la qorsheeyay, kadib markii dhakhtarka guud uu usoo gudbiyo isbitaalka oo khabiir takhsus arrinta u lehna uu qiimeyn ku sameeyo. Waxaa mararka qaarkood loo yaqaan daryeelka 'xulashada' ama 'aan-degdegga ahayn'.

Sababta aan ugu baahanahay inaan isbedel sameyno

In kabadan 1.5 milyan oo qof ayaa ku nool waqooyiga bartamaha London, tiradanna waxaa la filayaa inay sii kororto. Baahida loo qabo daryeel caafimaad ayaa sii kordheysa tanina waxay saameyn ku yeelan doontaa gaar ahaan qalliinka lafaha ee qorshaysan. In kasta oo qaar badan oo ka mid ah adeegyadan ay yihiin kuwa tayo wanaagsan leh waxaan ognahay in khibradaha bukaannada ay kala duwanaan karaan oo la sii wanaajin karo iyo in baahiyahaas la qiyaasayo inay sii kordhaan.

Liisaska sugitaanka ayaa ah kuwo aad u dheer

- Bishii Janaayo 2019, inka badan 10,500 qof oo deegaan ku ah woqooyiga dhexe ee London ayaa sugayey qalliinka lafaha ee qorshaysan.
- Intii u dhaxaysey Janaayo 2018 iyo Janaayo 2019 kaliya 79% bukaannada loo gudbiyey qalliinka lafaha ee waqooyiga bartamaha London ayaa bilaabey daaweynta 18 toddobaad gudahood; cisbitaaladayada qaarkood, tani waxay hoos ugu dhacday illaa 65% intii lagu jirey bilaha jiilaalka

Qalliino aad u badan ayaa la baajiyay

- Sanadkii 2018/19 guud ahaan waqooyiga bartamaha London, 530 qalliin oo orthopedic ah ayaa la baajiyay - 96% **oo kamid ah qalliinadan** waxaa la kansalay maalinta ay ahayd in qalliinka la sameeyo. Tani waxay u dhigantaa 10 qalliin oo la kansalay isbuuc kasta. Tan waxaa u sabab ahaa baahida adeegyada degdegga ah, sariiro la'aan ama shaqaale la'aan

Baahida qalliinka lafaha ee qorshaysan ayaa sii kordhaya

- Baahida loo qabo qalliinka lafaha ee qorsheysan ayaa la filayaa inuu kordho illaa 9.5% marka la gaaro 2029.

Haddii aan wax laga beddelin, uma eka in isbitaallada deegaanka ahi ay yareyn doonaan liisaska sugitaanka; tirada kansalida ayaa sii kordhi doonta; sifiicanna diyaar uguma noqon doono in aan wax ka qabanno baahida kordhaysa ee loo qabo adeegyada. Haddii soo-jeedintayada la oggolaado, NHS waxay sii wadi doontaa inay adeegyada qalliinka ku bixiso lacag lamid ah mida ay hadda bixinayso (ku dhowaad £ 37 milyan), hase yeeshe si fiican ayaan uga faa'iideysan karnaa lacagtan oo aan u horumarin karnaa daryeelka. Waqti dheer kadib, habkaan cusub haddii loo shaqeeyo waxaa la filayaa inuu lacag badbaadiyo.

Dhammaan hay'adda NHS kuwaas oo bixin doona daryeelka qalliinka lafaha ee la qorsheeyey iyagoo isticmaalaya soo-jeedintaan ayaa qayb ka ahaa soo saarista soo-jeedintaan.

Waxaan soo jeedineynaa hanaan cusub oo loogu talagalay in lagu abaabulo qalliinka lafaha ee qorsheysan kaas oo loogu talagalay dadka waaweyn ee woqooyiga bartamaha London

Laba iskaashi oo loogu talagalay daryeelka qalliinka lafaha ee qorsheysan ayaa waxaa sameeyay hayadaha isbitaalka NHS ee ka jira deegaanka - iyada oo ay iska kaashanayaan Jaamacadda Kulliyadda Caafimaadka ee London (UCLH) iyo jaamacadda Whittington, iyo Royal Free London Group (Royal Free, Isbitaalka Barnet, Isbitaalka Chase Farm) oo la shaqeeynaya Isbitaalka Jaamacadda ee North Middlesex. (Waqooyiga Mid).

Haddii soojeedinta la oggolaado, iskaashatadaani waxay keeni karaan horumar dhab ah oo ku saabsan sida aan u bixinno daryeelkan.

- Laba isbitaal oo NHS ah oo leh qolol qalliin keliya loogu talagalay iyo sariiro loogu talagalay bukaannada u baahan in ay habeenkii sii joogaan xarunta kadib markii qalliinka lagu sameeyo – Isbitaalka Chase Farm iyo Jaamacadda Kulliyadda Caafimaadka ee London.
- Waxaa jira xulasho ah isbitaalada NHS oo loogu talagalay kuwa u baahan qalliinka xilliyada maalinta ah
- Waxaa jira xulasho ah isbitaalada NHS oo loogu talagalay ballamaha bukaan socodka
- Fasallo waxbarasho oo la wanaajiyey oo loogu talagalay bukaannada si looga caawiyo inay fahmaan qalliinkooda iyo waxa ay tahay inay sameeyaan si ay gacan ugu geystaan soo kabsashadooda
- Ballamada lala sameeyo dhakhtar qalliin oo la magacaabay iyo kooxdiiisa qalliinka, kuwaas oo la joogi doona bukaannada illaa mudada ay ku jiraan daryeelka, ayadoon loo eegayn goobta uu daryeela ka dhacayo
- Taageerada baxnaaninta ah ee loogu talagalay bukaannada kadib qalliinkooda
- Helitaanka adeegyada daryeelka degdegga ah ee loogu talagalay bukaannada u baahan daryeel dheeraad ah kadib qalliinkooda
- Isuduwayaasha daryeelka si ay uga caawiyaan bukaanada qaba xaalado ay ka mid yihiin jahawareer ama naafonimada waxbarasho inay fahmaan daryeelkooda iyo halka ay ka dhici karto
- Qalliinada aadka u adag ayaa lagu samayn doona Isbitaalka Qaranka ee Qalliinada Lafaha ee Royal (Royal National Orthopedic Hospital), oo ah xarun takhasus u leh
- Bukaanada qaba xaalado kale oo caafimaad ee adag, sida dhiigbax (haemophilia), waxaa qalliinkooda lagu sameyn doonaa isbitaalku takhasusay daaweynta xaaladdooda
- Daryeelka daaweynta lafaha ee degdegga ah wuxuu ku sii socon doonaa dhammaan isbitaalada deegaanka ah kuwaas oo leh waaxda shilalka iyo gurmada.

Hamigeenna

Waxaa jira dhowr faa'iidooyin oo ay leedahay u abaabulidda daryeelka si ka duwan kuwii hore:

- Helitaanka daryeel joogto ah oo tayo sare leh oo loogu talagalay dhammaan bukaanada waqooyiga bartamaha London
- Awood u yeelashada inaad buuxiso baahiyaha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee loo qabo adeegyada
- Kala saaridda qalliinada degdegga ah iyo qalliinka qorshaysan, si looga fogaado in daqiiqadaha ugu dambeeya la kansalo
- Shaqaale takhasus leh oo diiradda saaraya qalliinka sare ee lafaha, oo sii kobciya xirfadooda fulinta qalliinka

Mustaqbalka waxaan rabnaa inaan hubinno in bukaanadu ay heli karaan qalliin tayo sare leh oo qorsheysan iyadoon jirin cabsi laga qabo kansalid, qalliinka lagu fuliyo waqtigii loogu talagalay.

Caqabadaha

Waxaan ogsoonahay in haddii isbedel yimaado, dadka qaarkood ay faa'iido darro ugu jirto:

- Bukaanada qaar waxaa laga yaabaa inay hal maalin oo dheeri ah sii safraan xilliga qalliinkooda
- Dadka booqdayaasha ah waxaa laga yaabaa inay safar dheeri ah galaan
- Shaqaalaha qaar ayaa laga yaabaa inay ka shaqeeyaan isbitaal ka duwan meesha ay caadiyan ka shaqeeyaan, maalmaha qaarkood ee usbuuca
- Dadka leh baahiyo dheeri ah (sida kuwa qaba naafonimada waxbarashada, ama jahwareerka) ayaa laga yaabaa inay ku wareeraan aaditaanka isbitaal aynan aqoon.

Liis ah faa'iidooyinka iyo caqabadaha ayaa laga heli karaa dukumintigayada wadatashiga. Waxaan jeclaan lahayn inaan maqalno fikradahaaga ku saabsan kuwan inta lagu guda jiro wadatashigayada.

Isbeddeladan maxay uga dhigan tahay bukaanada?

Isbedelka la soo jeediyay wuxuu saameyn ku yeelan karaa qof kasta oo ku nool shanta degmo, iyo tiro yar oo ka mid ah aagagga deriska ah, kuwaas oo mustaqbalka u baahan kara qalliinka lafaha ee qorsheysan. Si ay nooga caawiso go'aan qaadashadeena, waxaan jecel nahay inaan helmo jawaab celinta qof kasta oo khibrad u leh, ama xiiseynaya adeegyadan.


Iyadoo la tixraacayo soo jeedintena dhammaan bukaannada waxay la kulmi doonaan horumar weyn oo ku saabsan daryeelkooda, Si loo gaaro arrintan, bukaannada qaar waxaa laga yaabaa in mustaqbalka ay qalliin ku yeeshaan isbitaal kale, marka loo barbar dhigo qorshayaasha hadda jira. Qiyaastii 11,000 bukaan ayaa hadda ka diiwaangashan si ay u yeeshaan qalliinka lafaha ee qorsheysan sanad walba guud ahaan 10 isbitaal oo NHS ah iyo kuwo gaar loo leeyahay.

Marka la eego soo-jeedintayada, 1460 bukaan ayaa qalliinkooda ku yeelan doona isbitaal kale marka loo barbar dhigo nidaamka hadda jira iyo ku dhawaad 1360 bukaan oo u baahan seexashada xarunta qalliinka (sida qalliinka miskaha iyo jilibka) ayaa qalliinkooda lagu samayn doonaa isbitaal kale marka loo barbar dhigo nidaamyada hadda jira. *

Ayadoo ay la kaashanaayaan dhakhtarkooda guud ama dhakhtarkooda caafimaadka jirka, bukaanadu waxay dooran doonaan mid ka mid ah labada iskaashi ee loogu talagalay daryeelkooda qorshaysan ee qalliinka lafaha. Xulashada iskaashiga ayaa go'aamin doonta doorashada isbitaalka ay ka heli doonaan daryeelka bukaan socodka iyo halka loogu samayn doono qalliinkooda.

(* Tan waxaa ka mid ah bukaanada hada ku jira daryeelka caafimaad NHS ee isbitaal gaar loo leeyahay)

Where patients have care today




OUTPATIENT	DAY SURGERY	OVERNIGHT STAY
Barnet Hospital	Chase Farm	Chase Farm
Royal Free Hospital	Chase Farm	Chase Farm
Chase Farm Hospital	Chase Farm	Chase Farm
North Mid	North Mid	North Mid
UCLH	UCLH	UCLH
Whittington Health	Whittington Health	Whittington Health
Private hospitals	Private hospitals	Private hospitals

Where patients have care today	Halka ay bukaannadu maanta daryeel ku leeyihiin
OUTPATIENT	BUKAAN-SOCOD
DAY SURGERY	QALLIINKA MAALMEED
OVERNIGHT STAY	JOOGITAANKA ISBITAALKA EE QALLIINKA KADIB AH
Barnet Hospital	Isbitaalka Barnet
Chase Farm	Chase Farm
Chase Farm	Chase Farm
Royal Free Hospital	Isbitaalka Bilaashka ah ee Royal (Royal Free Hospital)
Chase Farm	Chase Farm
Chase Farm	Chase Farm
Chase Farm Hospital	Isbitaalka Chase Farm
Chase Farm	Chase Farm
Chase Farm	Chase Farm
North Mid	North Mid
North Mid	North Mid
North Mid	North Mid
UCLH	UCLH
UCLH	UCLH
UCLH	UCLH

Whittington Health	Xarunta Caafimaadka ee Whittington
Whittington Health	Xarunta Caafimaadka ee Whittington
Whittington Health	Xarunta Caafimaadka ee Whittington
Private hospitals	Isbitaalada gaarka loo leeyahay
Private hospitals	Isbitaalada gaarka loo leeyahay
Private hospitals	Isbitaalada gaarka loo leeyahay

Where patients go for care today vs where they could go under our proposals




Where patients go for care today vs where they could go under our proposals	Meesha ay bukaanku maanta u aadaan daryeel marka loo barbar dhigo halka ay u aadi lahaayeen haddii la raaco soo jeedintayada
North Middlesex University Hospital / Royal Free London Partnership	Isbitaalka Jaamacada North Middlesex / Royal Free London
UCLH / Whittington Health Partnership	Iskaashiga UCLH / Xarunta Caafimaadka Whittington
In the future	Mustaqbalka
Today	Maanta
The Kings Oak Hospital	Isbitaalka Kings Oak
The Cavell Hospital	Isbitaalka Cavell
Chase Farm Hospital	Isbitaalka Chase Farm
Highgate Private Hospital	Isbitaalka Highgate Private
Royal National Orthopaedic Hospital	Isbitaalka Qaranka ee Qalliinka Lafaha
North Middlesex University Hospital	Isbitaalka Jaamacada North Middlesex
Whittington Hospital	Isbitaalka Whittington
Royal Free Hospital	Isbitaalka Royal Free


UCLH	UCLH
National Hospital for Neurology and Neurosurgery	Isbitaalka Qaranka ee Cilmiga iyo Qalliinka Neerfaha
HERTFORDSHIRE	HERTFORDSHIRE
BARNET	BARNET
HARROW	HARROW
CAMDEN	CAMDEN
BRENT	BRENT
ENFIELD	ENFIELD
HARINGEY	HARINGEY
HACKNEY	HACKNEY
WALTHAM FOREST	WALTHAM FOREST
WESTMINSTER	WESTMINSTER
ISLINGTON	ISLINGTON
Royal National Orthopaedic Hospital	Isbitaalka Qaranka ee Qalliinka Lafaha
Chase Farm Hospital	Isbitaalka Chase Farm
Barnet Hospital	Isbitaalka Barnet
North Middlesex University Hospital	Isbitaalka Jaamacada North Middlesex
Whittingto Hospital	Isbitaalka Whittingto
Royal Free Hospital	Isbitaalka Royal Free
UCLH	UCLH
ENFIELD	ENFIELD
BARNET	BARNET
HARINGEY	HARINGEY
CAMDEN	CAMDEN
ISLINGTON	ISLINGTON
Outpatient appointment	Ballamaha bukaan socodka
Day surgery	Qalliin maalmeedka
Overnight stay	Joogitaanka xarunta qalliinka kadib
Super Specialist Centre	Xarunta Takhasuska Sare

Mustaqbalka, bukaanadu waxay dooran doonaan labada iskaashi ee ay ka heli doonaan daryeelkooda. Jadwalka soo socda wuxuu muujinayaa meesha bukaanadu ay u tagi doonaan qeybaha kala duwan ee daryeelkooda.

Overnight stay: Usually hip & knee surgery



Day surgery: Usually shoulder, hand and foot surgery
















Overnight stay: Usually hip & knee surgery	Joogitaanka Isbitaalka Qalliinka Kadib: Inta badan qalliinka miskaha & jilibka
GP & COMMUNITY CARE	DARYEELKA BULSHADA & DHAKHTARKA GUUD
OUTPATIENT APPOINTMENTS	BALLAMAHA BUKAAN SOCODKA
SURGERY	QALLIIN
FOLLOW UP	DABA-GAL
COMMUNITY POST-OPERATIVE CARE	DARYEELKA BULSHADA EE QALLIINKA KADIB AH
Barnet Hospital Chase Farm North Mid Royal Free London	Isbitaalka Barnet Chase Farm North Mid Royal Free London
Chase Farm	Chase Farm
Barnet Hospital Chase Farm North Mid Royal Free London	Isbitaalka Barnet Chase Farm North Mid Royal Free London
Outpatient appointment	Ballamaha bukaan-socodka
Overnight stay	Joogitaanka isbitaalka qalliinka kadib
UCLH Whittington Health	Xarunta Caafimaadka ee UCLH Whittington

UCLH	UCLH
UCLH Whittington Health	Xarunta Caafimaadka ee UCLH Whittington
Day surgery: Usually shoulder, hand and foot surgery	
GP & COMMUNITY CARE	DARYEELKA BULSHADA & DHAKHTARKA GUUD
OUTPATIENT APPOINTMENTS	BALLAMAHA BUKAAN SOCODKA
SURGERY	QALLIIN
FOLLOW UP	DABA-GAL
COMMUNITY POST-OPERATIVE CARE	DARYEELKA BULSHADA EE QALLIINKA KADIB AH
Barnet Hospital Chase Farm North Mid Royal Free London Chase Farm North Mid	Isbitaalka Barnet Chase Farm North Mid Royal Free London
Barnet Hospital Chase Farm North Mid Royal Free London	Isbitaalka Barnet Chase Farm North Mid Royal Free London
Outpatient appointment	Ballamaha bukaan socodka
Day surgery	Qalliin maalmeedka
UCLH Whittington Health	Xarunta Caafimaadka ee UCLH Whittington
UCLH Whittington Health	Xarunta Caafimaadka ee UCLH Whittington
UCLH Whittington Health	Xarunta Caafimaadka ee UCLH Whittington
North Middlesex University Hospital / Royal Free London Partnership	Iskaashiga Isbitaalka Jaamacada North Middlesex / Royal Free London
UCLH / Whittington Health Partnership	Iskaashiga UCLH / Xarunta Caafimaadka Whittington

Adeegyada qalliinka lafaha ee qorsheysan ee maanta iyo adeegyada hoos imaanaya soojeedinteena

Shaxda hoose waxay muujineysaa farqiga u dhexeeya daryeelka qalliinka lafaha ee laga heli karo woqooyiga bartamaha London maanta, oo ku xigta sida ay u ekaan doonto haddii soo jeedimahaan la hirgaliyo.

 Not available
  Available in some hospitals
 Available in the new arrangements

	Today	In the proposals
Hospitals carrying out larger numbers of orthopaedic operations provide higher quality care for patients		
Ring-fenced operating theatres, wards and specialist staff, separate from A&E departments, minimises cancellations and leads to better care		
Teams that carry out surgery six or seven days a week reduces waiting lists and makes maximum use of facilities		
High dependency or intensive care units and overnight senior medical cover provides support for patients who have complications		
Care coordinators to offer support patients with conditions such as learning disabilities and dementia		
Consistent education classes before surgery and high-quality rehabilitation ensures the same high-quality care, in all hospitals		

Not available	Lama heli karo
Available in some hospitals	Waxaa laga heli karaa isbitaalada qaarkood
Available in the new arrangements	Waxaa laga heli karaa qabanqaabooyinka cusub
Today	Maanta
In the proposals	Soo jeedinta
Hospitals carrying out larger numbers of orthopaedic operations provide higher quality care for patients	Isbitaalada sameynaya tirada badan ee qalliinka lafaha waxay bixiyaan daryeel tayo sare leh oo loogu talagalay bukaannada
Ring-fenced operating theatres, wards and specialist staff, separate from A&E departments, minimises cancellations and leads to better care	Qololka qalliinka oo qalabaysan, waaxyo iyo shaqaale takhasus leh, kuwaas oo ka duwan waaxaha A&E, waxay yareeyaan baajinada waxayna u horseedaan daryeel wanaagsan
Teams that carry out surgery six or seven days a week reduces waiting lists and makes maximum use of facilities	Kooxaha oo fuliya qalliin lix ama toddobo maalmood usbuucii waxay yareeyaan liisaska sugidda waxayna isticmaal wanaagsan ka sameeyaan xarumaha
High dependency or intensive care units and overnight senior medical cover provides support for patients who have complications	Ku tiirsanaanta sare ama qeybaha daryeelka degdegga ah iyo daaweynta iyo daryeelka qalliinada kadib ah waxay

	taageero siisaa bukaannada qaba cudurada
Care coordinators to offer supportpatients with conditions such as learning disabilities and dementia	Isuduwayaasha daryeelka si ay uga caawiyaan bukaanada qaba xaalado ay ka mid yihiin jahawareer ama naafonimada waxbarasho inay fahmaan daryeelkooda iyo halka ay ka dhici karto
Consistent education classes before surgery and high-quality rehabilitation ensures the same high-quality care, in all hospitals	Fasalada waxbarashada joogtada ah kahor qalliinka iyo dhaqancelinta tayada sare leh waxay xaqiijineysaa daryeel isku mid ah oo tayo sare leh, oo laga bixiyo dhamaan cosbitaalada

Sida soo-jeedintayada loo soo diyaariyey

Soo jeedinteena waxaa loo soo saaray qaab cusub oo leh wadashaqeyn dhex martay bixiyeyaasha adeegyada caafimaadka ee waqooyiga bartamaha London, iyadoo jawaab celin laga soo qaadayo dhakhaatiirta, Hay'adaha NHS (NHS Trusts), bukaanada deegaanka ku nool, daneeyayaasha, iyo dhowr kulan oo aqoon-isweydaarsi ah oo laga soo qeybgeliyey dhammaan kooxahaan.

Soo-jeedinteenna waxaa sidoo kale dib u eegis ku sameeyey Golaha Cilmiga Caafimaadka ee London, guddiga xirfadlayaasha NHS, bukaanno iyo kooxo kale. Waxay ku heshiiyeen inay jirto "arrin cad oo isbedel u baahan, iyadoo lagu saleeyey dhaqanka ugu wanaagsan ee qaranka iyo tixgelinta arrimaha deegaanka".

Qaar ka mid ah waxyaallaha ay bukaan-socodka sheegeen inay muhiim yihiin ayaa lagu soo daray soo-jeedimaha:

- Isuduwayaasha daryeelka si ay uga caawiyaan bukaanada qaba xaalado ay ka mid yihiin jahawareer ama naafonimada waxbarasho inay fahmaan daryeelkooda iyo halka ay ka dhici karto
- Isku-daritaanka diiwaankooda bukaanka ee dhijitaalka ah si macluumaadka loogu wadaagi karo si fudud
- Falanqeyn buuxda oo la xiriirta safarka iyo gaadiidka si ay nooga caawiso inaan fahamno saameynta qorshayaasheena iyo inaan la imaanshaha dariiqooyin lagu yareeyo carqalad kasta.
- Bukaannadu had iyo jeer waxay dooran doonaan halka ay ka helaan daryeelkooda; tani waa qayb ka mid ah dastuurka NHS.
- Waxaan ka codsanay khubarada ku takhasusay daryeelka degdegga ah inay si taxaddar leh u eegaan qorshayaasheena oo ay xaqiijiyaan in qorshayaasheena aysan wiiqi doonin daryeelka degdegga ah

Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa websaydkayaga ee:

www.northlondonpartners.org.uk/orth_consultation

Sida loo dhiibto aragtidaada

Waxaan rabnaa inaan helno fikradaha bukaanada, dadwaynaha, shaqaalaha iyo shuraakada intii suurtogal ah si aan ugu kabno qorshayaashayada inta lagu guda jiro wada tashiga dadweynaha. Tan waxaa ka mid ah dadka deggan Barnet, Camden, Enfield, Haringey, Islington iyo meelaha deriska la ah ee laga yaabo inay isticmaalaan adeegyada isbitaalada ku yaala woqooyiga bartamaha London. Waxaan si gaar ah u daneeyneynaa inaan maqalno qof kasta oo hadda qorsheeynaya ama horey usoo

qaatay qalliinka lafaha ee qorsheysan, qof kasta oo u baahan kara adeegyadan mustaqbalka iyo ugu baahan doona qoysaskooda iyo daryeelayaashooda.

Anaga oo ku marti qaadayna dadka inay kaqeybqaataan wadatashigaan waxaan rabnaa inaan ogaano haddii aan samaynay xalkii ugu fiicnaa ee suurta galka ah ee lagu xallin karo caqabadaha hada jira, sida soo jeedinta loo sii wanaajin karo iyo hadii ay jiraan soo jeedino kale oo aan anagu ku fakirin.

Dhammaan ra'yi-celinta waxaa qiimeyn doona shirkad madax-bannaan, oo la dhaho Participate Ltd.

Dokumentiga wadatashi oo buuxa waxaa laga heli karaa:

www.northlondonpartners.org.uk/orth_consultation

Fadlan nala socodsii faallooyinkaaga iyo aragtidaada ku saabsan soo jeedimahaan:

1) adigoo buuxinaya foomka su'aalaha wadatashiga ee daabacan kuna soo celinaya boostada adigoo isticmaalaya cinwaanka Freepost ee lagu siiyey.

2) Adigoo buuxinaya su'aalaha wadatashiga adigoo isticmaalaya xog-uruurinta onleenka ah ee:

www.northlondonpartners.org.uk/orth_consultation

3) Adigoo qoraal noogu soo diraya: **FREEPOST NLP ORTH CONSULTATION** (looma baahna istaambo ama koodhka boostada)

4) adigoo casuumaya kooxda barnaamijka, si aad ula hadasho kooxda adigoo isticmaalaya faahfaahinta xiriirka ee ku qoran halkaan hoose

5) Adigoo ku fikirkaaga ku bixinaya adigoo wacaya **Telefoonka Bilaash ah: 0808 1567192**

6) Ka qeybgalka shirarka dadweynaha inta lagu gudajiro waqtiga wadatashiga. Faahfaahinta buuxda ee arrimahaan waxaa laga heli karaa websaydhkeena. Haddii aad ka soo qeyb gasho mid ka mid ah shirarka dadweynaha ama munaasabadaha, aragtidaada ayaa qori doonaa.

Faahfaahinta kulamadaan waxay ku jiraan websaydyadeena.

Jawaabaha wada-tashiga waxaa si madax-bannaan u qiimeyn doona shirkadda Participate, oo warbixintooda la wadaagi doona go'aan-qaatayaasha.

- Bisha Maajo 2020, daneeyayaasha waxay fursad u heli doonaan inay ka faalloodaan qiimeynta qabyada ah iyo dib u eegista qiimeynta saameynta siman

- Bisha Juun 2020 qiimeynta jawaabaha, ra'ayi bixinta laga heley daneeyayaasha iyo qiimeynta saameynta ayaa waxa lala wadaagi doonaa Guddiga Guud ee Caafimaadka iyo Baadhitaanka (JHOSC). Kiis ganacsi oo go'aan qaadasho ah (DMBC) ayaa markaa la soo saari doonaa iyada oo lagu sharxayo go'aanka la soo jeediyey

- Bisha Juun / Luulyo 2020 bukaanada iyo NCL CCG waxay heli doonaan fursad ay dib ugu eegaan qiimeynta isla markaana ka wada hadlaan wixii saameyn ah. DMBC-da ugu dambaysa ayaa loo soo bandhigi doonaa NCL CCG si ay uga go'aan qaataan

Go'aanka kama dambaysta ah iyo natiijada wadatashiga ayaa si ballaadhan loo shaacin doonaa, waxaan sii wadi doonaa ka-qaybgalinta dadka deegaanka ah sidii aan u dhaqan-gelin lahayn wixii isbeddel ah ee lagu heshiiyo.

Waxaan kormeerii doonaa waqtiyada sugitaanka, kansalyada, qiimeynta dib u soo celinta, inta wakhti bukaanku isbitaal ku qaadanayo, natiijooyinka baaritaanka asxaabta iyo Qoyska iyo tilaabooyin kale oo aan ku hubineyno in isbedel kasta oo la hirgaliyo uu yahay mid waxtar leh.